

Dib-u-habaynta tubaakada Shiishada

Xaashida-macluumaadka ee ganacsiyada

Xaashidan macluumaadka ee ganacsiyada waa khulaaso ku saabsan sharciyada kontaroolidda tubaakada ee Victoria kuwaas oo khuseeya iibinta, xayeysiinta iyo isticmaalka tubaakada shiishada.

Dib-u-habaynta

Marka la raaco *Sharciga Tubaakada 1987 (Sharciga Tubaakada)*, iibinta, xayeysiinta iyo isticmaalka tubaakada shiishada oo ay ku jirto **xaddi kasta** oo tubaako ah waxaa loola dhaqmi doonaa si la mid ah waxyaalaha tubaakooyinka kale ah, sida sagareetka iyo sigaarka laga bilaabo **1da Agoosto 2017**.

Isbaddelladu macnahoodu waxay yihiin inaan tubaakada shiishada:

- lagu isticmaali karin goobaha laga mamnuucay sigaarka
- laga iibin karin qof ka yar da'da 18 sano
- lagu soo-bandhigi karin ama xayeysiin karin goobta iibka
- lagu iibin karin meel ku-meelgaar ah, sida baabuurka
- lagu siin karin, ama lacag la'aan lagu bixin karin, si loo xayeysiyo iibka shiishada waxyaalaha tubaakada molisiska ah.

Isbaddelladu waxay kaloo waafaqsan yihiin sharciyada baakadaynta caraabaha tubaakada ee Commonwealth kuwaas oo u baahan waxyaalaha tubaakada shiishada in lagu baakadeeyo baakadaynta caraabaha ee qasabka ah oo uu ku qoran yihiin muuqaalo digniin caafimaad ah.

Furuudka ama waxyaalaha herbaalka ku salaysan oo aysan ku jirin tubaakadu ma hoos yimaadaan sharciyadan.

Ku-dhaqanka sharciga

Meelaha cabidda tubaakada shiishada laga mamnuucay

Cabidda tubaakada shiishada waxaa laga mamnuucay dhammaan goobaha halkaas oo cabiddu lagu mamnuucay Sharciga Tubaakada. Kaasna waxaa ka mid ah goobaha shaqada ee xidhan sida kaafeeyada, fadhiyada iyo goobaha laysanada haysta. Laga bilaabo 1da Agoosto 2017, mamnuucyada sigaarka waxaa lagu daray:

- meelaha dibadda ee lagu qadeeyo
- meelaha cabitaanka dibadda haddii qayb kasta u jirto 4 mitir ee meesha cabitaanka dibadda, inuu kala saarayo derbi kaas oo dherar-keeda ugu yaraan yahay 2.1 mitir.

Si loogu dhaqmo sharcigan cusub, ganacsiyada sida keefyada iyo fadhiyada shiishada waa inay wax ka baddeli doonaan howlahooda iyo falalkooda.

Isbaddelladan waxaa loo sameeyey shiishada si loo horumariyo loona ilaaliyo caafimaadka iyo fayoobida bulshada. Waxaa lagu daray mamnuucidda sigaarka ee goobaha shaqada kuwaas oo gacan ka agaysta inay ilaaliyaan shaqaalaha iyo Macaamiisha.

Ganacsiyada la-sameeyey waxay tixgelin karaan inay adeegsadaan boosadka dibadeed oo u xiran goobtooda halkaas oo aan sigaarka laga mamnuucin. Ganacsiyada waa inay kala hadlaan goleyaasha degaankooda waxii ogolaansho ah ee u isticmaalka meelaha dadku maro isticmaalka tubaakada shiishada.

libinta tubaakada shiishada

Maamuleyaasha iyo shaqaaluhu waa inay hubiyaan in qofku uu ka weyn yahay da'da 18 ka hor intaan laga iibin tubaakada shiishada ah. Waxay u baahan yihiin inay weydiiyaan foomamka aqoonsiga oo la aqbali karo badidba kaysaska.

Maamuleyaasha ayaa ka masuula inay habsiiyaan shaqaalaha inay u iibiyaan tubaakada shiishada si waafaqsan sharciga. Maamuleyaasha waxay uga dheeraan karaan ganaaxa ayagoo shaqaalaha ku

tababara lixdii bilood oo kasta kana hela xaqiijin qoraal ah shaqaalaha oo ah inay heleen tababarkaas.

Tababarku waa inuu daboolaa:

- in shaqaaluhu aysan ka iibin tubaakada shiishada qof ka yar 18
- in shaqaaluhu ay weydiiyaan oo arkaan aqoonsiga ka hor ka-iibinta tubaakada shiishada qof ka yaraan kara 18
- in haddii shaqaaluhu ay ka iibiyaan tubaakada shiishada qof ka yar 18, ay galayaan danbi lana ganaaxayo.

Bandhigga iyo xayeysiinta shiishada

Ganacsiyadu waxay u baahan yihiin inay hubsadaan in tubaakada shiishada oo iibka u diyaarka ah iyo wixii xayeysiin oo la xiriira waa inaan laga arki karin meel kasta oo gudaha iyo dibadda dukaanka ah.

Tubaakada shiishada waa in la dhigaa armaanjada gudaheeda ama gadaalka koontarka si la mid waxyaalaha tubaakada kale ah.

Sababaha isbaddellada

Ilaa 2006, sigaar cabidda waxaa laga mamnuucay goobaha shaqada oo xidhan ee Victoria.

Mamnuuciddaas waxay khuseysaa tubaakada shiishada halkaasoo tubaakada tahay **waxay ka kooban tahay** oo ugu muhiimsan.

Isbaddelladii dhawaan waxay ku fidiyeen sharciyada khuseeya tubaakada shiishada si loogu daro shiishada taas oo ay ku jiraan xaddi kasta oo tubaako ah.

Taasina waa si loo ilaaliyo caafimaadka bulshada loona yareeyo cudurada iyo xanuunka la xiriira tubaakada.

Sharciyada cusub waxay ujeedaan inay:

- ka ilaaliyaan shaqaalaha iyo macaamiisha saamaynta waxyeellooyinka ee gaarista iyo cabidda sigaarka ee gacanta-labaad ee gudaha goobaha-shaqada ee xidhan, sida keefyada iyo fadhida shiishada
- ka ilaaliyaan dadka ka yar da'da 18 sano inay gataan oo helaan tubaakada shiishada.
- ka-hortagaan cabidda iyo qaadashada tubaakada shiishada, gaar ahaan carruurta iyo dadka dhalinta ah kuwaas oo ay soo-jiidan karto noocan cabiddaa.
- taageeraan dadka isku-dayaya inay joojiyaan cabiddaas, ama kuwa dhawaanta joojiyey
- bixiyaan joogtaysi habka waxyaalaha tubaakada ee kale loo maamulo.

Khataraha caafimaad

Waxaa jira caddayn xooggan ee cabidda qiiqa tubaakada shiishada iyo gaarista qiiqeeda uu ku hayo

khataraha caafimaadka oo waxyeellada leh. Isticmaaleyaasha tubaakada shiishada iyo kuwa ay gaarto gacan-labaad ahaan waxay khatar u yihiin noocyo badan oo isku mid ah ee cuduro iyo xanuuno ay keento cabidda sigaarka oo ay ka mid yihiin kansarka sanbabada, xanuunada neef-mareenka iyo miisaanka dhalashada ee yar inta uurku jiro. Waxaa jira fahmid la'aan guud ee isticmaalka tubaakada shiishada inuu yahay khayaar ka ammaan badan cabidda sigaarka. Taasi waa khalad.

Cabbeyaasha tubaakada shiishada waxay gaarsiin kartaa kiimikada waxyeellada leh oo la mid ah ama ka heer sarraysa marka la barbar-dhigo cabitaanka sigaarka.

Marka la raaco Haya'dda Caafimaadka Adduunka (World Health Organization), fadhida cabidda tubaakada shiishada waxaa ku jiri kara ku-neefsigii qiiqa kaas oo la mid ah cabidda 100 sigaar.¹

Ciqaabaha

Ciqaabaha waxay la mid yihiin waxyaalaha tubaakada kale sida sigareetka iyo sigaarka. Tusaale, haddii aad u ogolaato ku-cabidda tubaakada shiishada meel sigaarka ka-mamnuuca ah sida goobta-shaqada oo xidhan ama meelaha qadada dibadda ee ganacsigaaga, waxaad helaysaa ganaax laba halbeeg ciqaab ah, oo u dhiganta \$317 2017–18.²

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah:

- ka wac Khadka Macluumaadka Tubaakada oo ah 1300 136 775
- ka eeg [tobacco reforms website](http://www.health.vic.gov.au/tobaccoreforms) <www.health.vic.gov.au/tobaccoreforms>.

Si loo arko erayada saxda ah ee sharciga laga bilaabo 1da Agoosto 2017, ka eeg [website-ka qaanuunka](http://www.legislation.vic.gov.au) ee Dowladda Victoria <www.legislation.vic.gov.au> kana baar *Tobacco Act 1987*.

¹ Haya'dda Caafimaadka Adduunka 2005, cabidda tubaakada baybka-biyaha ah: *saamaynta caafimaadka, baahiyaha cilmi-baarista iyo tallaabooyinka ay ku taliyeen sharci-dajiyeyaashu*, Haya'dda Caafimaadka Adduunka, Geneva

² Halbeega ciqaabta sannadka kasta waa la qiimeeyaa. Hal halbeeg ciqaab 2017–18 waa \$158.57.

Si aad ugu hesho daabacaddan qaab la heli karo ka wac Khadka Macluumaadka Tubaakada oo ah 1300 136 775 adoo adeegsanaya Adeegga National Relay Service 13 36 77 haddii loo baahdo, ama email tobaccopolicy@health.vic.gov.au

Waxaa idmay oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.

© State of Victoria, May 2017.

FAAFREEB: Fadlan ogsoonow in wixii talooyin ah oo ku jira xaashidan macluumaadka waa tilmaamid guud oo keliya. Department of Health and Human Services ma aqbalayo wixii qansheeg ah ama khasaaro ah ama waxyeello ah oo ka timaadda natiijada isku-hallaynta talooyinkan ku jira xaashidan macluumaadka. Wax ka mid ah xaashidan macluumaadka oo baddeli kara raadsiga talooyinka sharciiyeed oo habboon ma jiro.

ISBN: 978-0-7311-7162-0

Laga heli karo

www.health.vic.gov.au/tobaccoreforms